

King County

Best Starts for KIDS

Best Starts for Kids – Daryeelka Carruurta Barnaamijka Tijaabada ee Kordhinta Mushaharka (Wage Boost Pilot)

Nooca: 1.2.2

Maarso 2026

ANAGO SHURAKO LA AH

THE IMAGINE INSTITUTE

AidKit

Tusmada Buug-gacmeedka

Tusmada Buug-gacmeedka 2
Dulmar 5
Waxyaalaha Ka Cusub Buug-gacmeedka 5
Maxaa Loo Cusbooneysiiyay Buug-gacmeedka? 5
Maxaa Ka Cusub Buug-gacmeedka 6
Macluumaad Guud 8
Barnaamijka Best Starts for Kids ee Kordhinta Mushaharka Daryeelka Carruurta 8
Sababta Best Starts for Kids ay u samaynayso maalgelintan 8
Sababta Best Starts for Kids ay u samaynayso Tijaabo 9
Sida uu Barnaamijka Tijaabada u Shaqeeyo 9
Dan-wadaagayaasha Barnaamijka Tijaabada 10
Kadib Markuu Dhamaado Barnaamijka Tijaabada 11
Hawlaha iyo Faahfaahinta Barnaamijka Tijaabada 11
Boosaska La Heli Karo ee Barnaamijka Tijaabada 11
XARUNTA 12
Dib-u-eegista Boosaska La Heli Karo ee Xaruntaada 12
Haddii uu shaqaale ka tago xarun kadib markii la doorto barnaamijka Tijaabada 13
SHAQAALE 13
Shaqaalaha ka shaqeeya xarumo badan oo la doortay 13
U-qalmitaanka Barnaamijka iyo Diiwaangelinta 13
XARUNTA 14
Shuruudaha Shaqaalaha iyo Awoodda 14
Diiwaangelinta Wakiilka Xarunta 14
SHAQAALE 14
Shaqaalaha Fasax Muddo Dheer ah oo La Ansixiyay 14
Ilaalinta U-qalmitaanka Barnaamijka 15
XARUNTA 15
Xiritaanka Xarumaha 16

Filashooyinka ku saabsan Mushaharka iyo Faa'iidooyinka Shaqaalaha 16
Xeerka Ka-joojinta ka-qaybgalka Barnaamijka 16
SHAQAALE 17
Isbeddellada Xaaladda Shaqada 17
Isbeddelada heerka shaqo ee waqti-buuxa ama waqti-kooban 17
Ka Bixitaan Ikhtiyaari ah ama Ka-qayqaadasho La'aan 17
Go'aansashada inaadan is diiwaangelin 17
Ka tagista shaqadaada ama beddelashada xarumaha 18
Haddii uu shaqaale ka baxo Barrnaamijka Tijaabada 18
La-talin Ku Saabsan Canshuuraha iyo Faa'iidooyinka 18
Saameynta canshuuraha 18
Saameynta faa'iidooyinka ku saleysan dakhliga 18
Lacag-bixinta 19
Joogtaynta Lacag-bixinta 19
Habka lacag-bixinta 19
U-qalmitaanka Lacag-bixinta Saddexdii Biloodba Mar 19
Maareynta waxyaalaha laga bedelay iyo dhibaatooyinka lacag-bixinta 22
Isbeddelada Macluumaadka Bangiyada ama Lacag-bixinta 22
Soo celinta lacag si khalad ah aad ku heshay 22
Xaddidaadaha isticmaalka lacagaha ..... **Error! Bookmark not defined.**
Maxaa dhacaya haddii lacag-bixintu istaagto oo ay u muuqato inuu qalad jiro? 23
Macluumaadka Bangiga Iyo Asturnaanta 23
Doorka AidKit ee Barnaamijka Tijaabada 23
Macluumaadka shaqsiga ee ay ururiso AidKit 23
Meesha iyo sida macluumaadka bangiga loo kaydiyo loona ilaaliyo 24
Sida AidKit ay u ilaaliso macluumaadka shaqsiga 24
Dib-u-eegista ama sixitaanka macluumaadka shaqsiga 24
Ka noqoshada oggolaanshaha wadaagista macluumaadka shaqsiga 24
Walaacyada ku saabsan asturnaanta macluumaadka 24

Sida Loo Isticmaalo Kaarkaaga Debit-ka 24
Waqtiga aad ku heleyso kaarka debit-ka oo laguu gilinaayo boostada 24
Macluumaadka Guud ee Kaarka 25
Ku-xiritaanka PIN-ka 25
Fiirinta haraagaaga 25
Helidda taageero ku saabsan kaarkaaga GiveCard 26
Kaararka Lumay ama La Xaday 26
Xaddidaadaha Isticmaalka lacagta 26
Wax Iibsashada Onlaynka ah 26
Khilaafaadka iyo Racfaannada 27
Ujeeddo 27
Baaxadda 27
Mabaadi'da Guud 27
Sababaha Racfaanka 27
Habka Gudbinta Cabashada ama Racfaanka 27
Xallinta 28
Diiwaan-hayn 28
Qiimeynta iyo Waxyaabaha Laga Bartay Barnaamijka Tijaabada 28
Fikir-celinta iyo Wada-xiriirka 29
Taageero Farsamo iyo Caawimaad 29

Dulmar

Hambalyo! Xaruntaada waxaa loo doortay inay ka qayb qaadato barnaamijka Best Starts for Kids ee kordhinta mushaharka daryeelka carruurta. Buug-gacmeedkan wuxuu bixinayaa macluumaadka lagama maarmaanka u ah si loo xaqiijiyo in wakiilka xaruntaada iyo shaqaalaha diiwaangashan ay fahmaan shuruudaha joogtada ah ee ka-qaybgalka barnaamijka, waxa uu sharxayaa xaaladaha gaarka ah ee u baahan in wakiilka xarunta iyo/ama shaqaaluhu la xiriiraan la-hawlgalayaasha barnaamijka, sidoo kale wuxuu tilmaamayaa sida loo maareeyo su'aalaha iyo arrimaha soo bixi kara inta lagu jiro ka-qaybqaadashada barnaamijka.

Waxyaalaha Ka Cusub Buug-gacmeedka

Nooca: 1.2

Maarso 2026

Maxaa Loo Cusbooneysiiyay Buug-gacmeedka?

Buuggan waxaa loo cusbooneysiiyay si uu u muujiyo isbeddelada shuruucda iyo habraacyada barnaamijka Tijaabada. Isbeddeladan waxaa loogu talagalay in buug-gacmeedkan laga dhigo mid cad, sahlan in la isticmaalo, isla markaana la waafajiyo hawlaha barnaamijka Tijaabada ee hadda jira, taasoo ka caawinaysa ka qaybgalayaasha iyo xarumaha inay fahmaan xeerarka barnaamijka, waxyaalaha laga filanaayo, iyo hababka lacag-bixinta.

Isbeddeladan waxaa loo sameeyay si loo:

1. Cadeeyo Shuruucda iyo Habraacyada Barnaamijka Tijaabada
   - In la fududeeyo cinwaannada qaybaha iyo luqadda si ay u sahlanaato isticmaalka.
   - In la xaqiijiyo in ka-qaybgalayaasha iyo xarumaha ay si fiican u fahmaan shuruudaha u-qalmitaanka, diiwaangelinta, iyo lacag-bixinta.
2. Siiyo Ka-qeybgalayaasha Ikhtiyaaro Dheeri ah Iyadoo La Ilaalinayo Caddaaladda
   - In la soo bandhigo siyaasadda **cusub** ee laba-boos ee is-bedbedelka ah, si ay xarumuhu u helaan dabacsanaan ay ku maareeyaan isbeddellada shaqaalaha.
   - In loo caddeeyo xeerarka shaqaalaha beddelaya xarumaha si loo dejiyo filashooyin sax ah.
3. Xaqiijiyo in Macluumaad Lacag-bixinta uu Saxanyahay oo Hada uu Yahay
   - In meesha laga saaro tixraacyadii duugoobay ee lacag-bixintii bilowga barnaamijka 2025.

- n la bixiyo hagitaan cad oo ku saabsan u-qalmitaanka lacag-bixinta saddexdii biloodba mar, oo ay ku jiraan tusaalooyin.

4. Hagaajiyo u-hoggaansanaanta iyo maamulka barnaamijka.
   - In la caddeeyo waajibaadka xarumaha, oo ay ku jirto ogeysiinta shaqaalaha barnaamijka haddii xarun la xiro.
   - In la hubiyo in wakiillada xarumaha si sax ah loo diiwaangeliyay.
5. Kordhiyo daahfurnaanta iyo fahamka ka-qaybgalayaasha.
   - In si cad loo muujiyo jadwalka iyo ikhtiyaarrada la xiriira doorashada in aan la is-diiwaangalinin.
   - In la sharaxo sida isbeddellada shuruudeed ay u saameeyaan u-qalmitaanka barnaamijka iyo kordhinta mushaharka.

Maxaa Ka Cusub Buug-gacmeedka

Qaybta	Waxa Isbeddelay	Waxyaabaha Muhiimka ah ee Ka-qaybgalayaashu Ogaanayaan
Hawlaha Barnaamijka Tijaabada	Boosaska barnaamijka ee la heli karo ayaa wax laga beddelay si loogu daro xeerka cusub ee laba-boos ee is-bedbedelka ah; xeerarka xarunta iyo shaqaalaha ayaa la caddeeyay; waxaa meesha laga saaray macluumaadka duugoobay	Xarun kasta hadda waxay yeelan kartaa ilaa laba boos oo aan la isticmaalin mar kasta. Boosaska ka badan xadkaas si toos ah ayaa dib loogu qaybiyaa saddexdii biloodba mar; kordhinta mushaharka ma wareegto marka xarun la beddelo; hagitaan cad ayaa la siiyay xarumaha iyo shaqaalaha
U-qalmitaanka iyo Diiwaangelinta	Macluumaad cusub ayaa lagu daray oo ku saabsan diiwaangelinta, liiska sugitaanka, iyo habka diiwaangelinta xarumaha; inay muddada jawaabta 45-maalmood tahay ayaa la caddeeyay	Ka-qaybgalayaashu waxay fahmayaan sida loo diiwaangashan yahay, sida looga jawaabo casuumaadaha, iyo waxa la filayo haddii ay ku jiraan liiska sugitaanka
Ilaalinta U-qalmitaanka Barnaamijka	Nuxurka ayaa dib loo habeeyay; shuruucda la xiriira waa la isku geeyay; hagitaan ku saabsan xiritaanka xarunta iyo xeerarka xaaladda shaqada ayaa lagu daray	Way fududahay in la helo xeerarka u-qalmitaanka; ka-qaybgalayaashu waxay fahmayaan waxa saameeya u-qalmitaanka iyo lacag-bixinta
Ilaalinta U-qalmitaanka Barnaamijka	Waxaa lagu daray: u-qalmitaanka lacag-bixinta ka dib xiritaanka joogtada ah wuxuu ku xiran yahay	Waxaa la waafajiyay xeerka WAC ee xiritaanka ku-meelgaarka ah si loo

	taariikhda xiritaanka; xiritaanka ku-meelgaarka ah waa inuu waafaqsan yahay WAC 110-300-0016	caddeeyo waxa loo aqoonsado xiritaan ku-meelgaar ah
Lacag-bixinta	Macluumaadkii hore ee lacag-bixinta ugu horreysa ayaa meesha laga saaray; qayb cusub oo ku saabsan u-qalmitaanka lacag-bixinta saddexdii biloodba mar ayaa lagu daray oo leh tusaale; hagitaanka cusboonaysiinta lacag-bixinta waa la mideeyay; jadwalka kaarka debit-ka waa la guuriyay	Macluumaad cad ayaa la bixiyay oo ku saabsan u-qalmitaanka lacag-bixinta, jadwalka, iyo sida loo maareeyo cusboonaysiinta ama helitaanka kaarka debit-ka
Taageero Farsamo	Caawimaada taleefanka ee luuqadaha Carabi, Hindi, iyo Maay Maay ayaa meesha laga saaray; turjumaada telefoonka ayaa wali waa la heli karaa	Ka-qaybgalayaashu waxay ogaanayaan luqadaha lagu helaayo taageero iyo sida loo helo caawimaad

Macluumaad Guud

Barnaamijka Best Starts for Kids ee Kordhinta Mushaharka Daryeelka Carruurta

Barnaamijka Best Starts for Kids ee kordhinta mushaharka daryeelka carruurta waa maalgelin cusub oo ka timid lacagta ay ansixiyeen codbixiyeyaasha ee Best Starts for Kids (Best Starts) ee King County. Barnaamijkan waxa uu maalgelin ku sameeyaa koox shaqaale daryeel carruur ah, wuxuuna doonayaa inuu muujiyo sida maalgelinta dowladda ay uga faa'iido ugu noqon karto qaybta daryeelka carruurta, shaqaalaha, qoysaska, iyo bulshada. Barnaamijku waxa uu maalgelinayaa in ka badan $25 milyan oo ah baqshiish dheeri ah oo la siinayo shaqaale daryeel carruur ah oo diiwaangashan ilaa 2027. Waxaa la filayaa barnaamijku inuu gaaro 1,400 shaqaale oo heli doona baqshiish dheeri ah oo ah kordhin mushahar saddexdii biloodba mar inta ay ku jiraan barnaamijka.

Sababta Best Starts for Kids ay u samaynayso maalgelintan

Daryeelka carruurta waa aasaas muhiim ah oo ka mid ah bulshada, wuxuuna ka qayb qaataa caafimaadka, nolosha bulshada, iyo horumarka dhaqaale ee bulshadeena oo dhan. Si kastaba ha ahaatee, daryeelka carruurta looma maalgeliyo sida kaabayaasha kale ee muhiimka ah, sida waxbarashada K-12, daryeelka caafimaadka, iyo gaadiidka. Shaqaalaha daryeelka carruurta waxay bixiyaan daryeel muhiim ah iyo waxbarasho hore oo xirfad iyo khibrad qoto dheer leh, haddana waxay ka mid yihiin shaqaalaha mushaharkoodu ugu hooseeyo. Mushaharradan hoose waxay sababaan is-bedbedel shaqaale oo sareeya, taageero dhaqaale iyo xasillooni la'aan shaqaalaha iyo qoysaskooda, iyo sidoo kale xulashooyin kooban oo aan degganayn oo bulshada dhexdeeda ah.

Intii lagu guda jiray horumarinta Hindisaha Best Starts, qoysaska iyo bixiyeyaasha adeegga daryeelka carruurta waxay u sheegeen King County in maalgelinta dowladda ee qoto-dheer ee qaybta daryeelka carruurta ay muhiim u tahay in daryeelku noqdo mid qoysaska ay awoodi karaan kharashaadkooda, isla markaana shaqaaluhu si wanaagsan loogu baqshiisho. King County waxay aqoonsan tahay in daryeelka carruurta loo baahan yahay in lagu taageero sidii kaabayaasha muhiimka ah iyada oo loo marayo maalgelin dadweyne oo ballaaran. Hindisaha labaad ee canshuurta levy, Best Starts waxa ay ku maalgelinaysaa $200 milyan oo dheeri ah si loo taageero qaybta daryeelka carruurta oo talaabo u ah in daryeelka carruurta loo aqoonsado kaabayaal muhiim ah. Qayb ka mid ah maalgelintan, qiyaastii $30 milyan ayaa loo qoondeeyay Barnaamijka Best Starts ee Kordhinta Mushaharka Daryeelka Carruurta (Barnaamijka Tijaabada).

Barnaamijka Tijaabada waxa uu ka dhashay talooyinka bulshada, waxa uu taageero ka helay codbixiyeyaasha King County, waxaana uu siinayaa taageero muhiim ah shaqaalaha daryeelka carruurta ee hadda jira, iyadoo la ogaanayo saameynta maalgelinta dowladda. Markii la ogaado saameynta maalgelinta dowladda ee shaqaalaha daryeelka carruurta, Best Starts waxa ay rajaynaysaa in la helo waddo loogu socdo qaybta daryeelka carruurta ee waarta, taasoo taageerta daryeelka shaqaalaha iyo bixinta daryeel joogto ah oo ay qoysaska awoodi karaan kharashaadkooda. Waxyaalaha la baran doono barnaamijkan waxaa lala wadaagi doonaa bulshada oo dhan si loogu hago siyaasadda dadweynaha iyo tallaabooyinka King County iyo meelaha kale.

Sababta Best Starts for Kids ay u samaynayso Tijaabo

Barnaamijkan tijaabada ah waa hawl muddo gaaban socota oo loogu talagalay in lagu muujiyo sida maalgelinta dowladda ay uga faa'iido ugu noqon karto qaybta daryeelka carruurta. Waxyaabaha laga barto barnaamijkan tijaabada waxay ka dad caawin doonaan dejinta barnaamijyo, istaraatiijiyado, iyo siyaasado mustaqbalka ah oo taageeri kara qaybta daryeelka carruurta. Waxyaalaha laga bartay barnaamijkan waxaa la qorsheeyay in lala wadaago bulshada oo dhan, oo ay ku jiraan shaqaalaha daryeelka carruurta, u doodeyaasha daryeelka carruurta, ururrada bulshada ku saleysan iyo isbahaysiyada, iyo sidoo kale sharci-dejiyayaasha.

Sida uu Barnaamijka Tijaabada u Shaqeeyo

Barnaamijka Best Starts ee kordhinta mushaharka daryeelka carruurta wuxuu maalgelinayaa in ka badan $25 milyan oo baqshiish dheeri ah oo la siinayo shaqaalaha daryeelka carruurta ee diiwaangashan ilaa 2027. Barnaamijku wuxuu filayaa inuu gaaro 1,400 shaqaale oo heli doona kordhin mushahar saddexdii biloodba mar inta ay ku jiraan barnaamijka Tijaabada.

Xarumaha daryeelka carruurta ee shatiga haysta ee ku yaalla King County, kuwaas oo buuxiya shuruudaha ugu yar ee u-qalmitaanka barnaamijka (hoos ka eeg shuruudaha u-qalmitaanka), ayaa lagu casuumayaa inay codsadaan ka-qaybgalka barnaamijka. Barnaamijkan wuxuu siin doonaa baqshiish dheeri ah shaqaalaha u qalma ee ka shaqeeya xarumaha la doortay. Xarumaha waxaa lagu dooran doonaa hab bakhtiyaa-nasiib ah si loo xaqiijiyo hab furan oo caddaalad ah. Marka xarumaha la doorto, shaqaaluhu way iska diiwaangelin doonaan barnaamijka. Shaqaalaha ku jira barnaamijka waxay sii jirayaan mashruuca inta ay shaqadoodu socoto ama ilaa 2027, hadba midkii soo hor mara.

Dan-wadaagayaasha Barnaamijka Tijaabada

Barnaamijka Best Starts ee Kordhinta Mushaharka Daryeelka Carruurta wuxuu ka kooban yahay dhowr dan-wadaagayaal oo leh doorar kala duwan si ay u maamulaan barnaamijka una daraaseeyaan saameyntiisa. Hadda waxaa jira laba dan-wadaagayaal oo taageera hirgelinta iyo maamulka barnaamijka, iyo laba kale oo qiimeyn sameeya si ay u daraaseeyaan saameynta iyo waxyaabaha laga baranaayo.

Dan-wadaagayaasha Naqshadeynta iyo Hirgelinta: Dan-wadaagayaashaan waxay si wadajir ah uga shaqeeyaan naqshadeynta iyo hirgelinta barnaamijka Tijaabada.

- The Imagine Institute waa hoggaamiyaha naqshadeynta iyo hirgelinta, wuxuuna taageeraa wada-xiriirka iyo wacyigelinta, sidoo kale wuxuu siiyaa ka-qaybgalayaasha barnaamijka Taageero Farsamo iyo taageero joogto ah
- AidKit, Inc waa maamulaha lacag-bixinta, waxayna martigelisaa nidaamka webka iyo diiwaangelinta; sidoo kale waxay maamushaa dhammaan lacagaha tooska ah ee la siiyo shaqaalaha ka-qaybgalaya barnaamijka.

Dan-wadaagayaasha Qiimeynta: Barnaamijka Tijaabada wuxuu daraaseyn doonaa sida maalgelinta dowladda ay uga faa'iido ugu noqon karto qaybta daryeelka carruurta, shaqaalaha, qoysaska, iyo bulshada.

- Urban Institute iyo Cardea Services ayaa hoggaaminaya qiimeynta si loo muujiyo saameynta kordhinta mushaharka ee ku saabsan joogitaanka shaqaalaha, daryeelka shaqaalaha, iyo joogtaynta daryeelka. Iyadoo la adeegsanayo waxyaabahan laga barto, Best Starts waxay rajaynaysaa inay hagto siyaasadaha iyo maalgelinta mustaqbalka heer deegaan, gobol, dowlad-goboleed, iyo federaal.

Barnaamijka Tijaabada sidoo kale wuxuu leeyahay koox shaqo oo taageerta hirgelinta iyo cilmi-baarista la xiriirta barnaamijka, isla markaana ka qayb qaadata hagidda tallaabooyinka mustaqbalka si loo keeno isbeddel nidaamsan.

- Uncommon Bridges taageertaa horumarinta iyo hoggaaminta joogtada ah ee Kooxda Shaqada. Kooxdan waxaa ka mid noqon doona shaqaale kala duwan, adeeg-bixiyeyaasha, dan-wadaagayaal, iyo daneeyayaal muhiim ah oo la xiriira qaybta daryeelka carruurta, waxayna diiradda saaraysaa awood-siinta shaqaalaha, khibradahooda nololeed, aqoontooda, xirfadooda, iyo hoggaamintooda.

Sanadkii 2026, We Are RALLY, waxay ku biirtay kooxda Barnaamika Tijaabada sidii dan-wadaagaha wada-xiriirka. RALLY waxay hoggaamin doontaa mashaariic wada-xiriir ah si ay u taageerto beddelka sheekooyinka iyo sheeko-wadaagga barnaamijka Tijaabada. Shaqadani waxay sanado badan taageeri doontaa raadadka iyo saameynta barnaamijka.

Kadib Markuu Dhamaado Barnaamijka Tijaabada

Barnaamijka Tijaabada wuxuu ururin doonaa waxyaabaha laga barto si loo muujiyo saameynta maalgelinta dowladda ee kordhinta mushaharka, gaar ahaan joogitaanka shaqaalaha, daryeelka shaqaalaha, iyo joogtaynta daryeelka. Best Starts waxay damacsan tahay inay isticmaasho waxyaabahan laga barto si ay uga hagto isbeddelada nidaamka, dejinta siyaasadaha, iyo maalgelinta mustaqbalka.

Sidoo kale, waxaan rajeynaynaa, isla markaana aan heynaa caddeyn muujinaysa, in shaqaalaha helaya kordhinta mushaharka inta lagu jiro barnaamijka ay arki doonaan natiijooyin aad u wanaagsan. Daraasadaha Dakhliga Aasaasiga ah ee Guud iyo natiijooyinka ka yimid lacagaha kicinta ee federaalka waxay muujinayaan in xitaa maalgelin muddo gaaban ah ay si weyn u hagaajin karto xasilloonida iyo daryeelka mustaqbalka ee shaqsiyaadka iyo qoysaska.

Kooxda Shaqada ee barnaamijka Tijaabada waxay keenayaan codka shaqaalaha daryeelka carruurta, waxayna ka qayb qaadanayaan sida waxyaabaha laga barto iyo caddeynta laga helay barnaamijka Tijaabada ay saameyn karaan tallaabooyinka mustaqbalka.

Hawlaha iyo Faahfaahinta Barnaamijka Tijaabada


Qaybaha soo socda waxay ku siinayaan macluumaad muhiim ah oo ku saabsan barnaamijka Tijaabada, waxaana loogu talagalay inay ka jawaabaan su'aalaha ka imaan kara wakiillada xarumaha ama shaqaalaha ka shaqeeya xarumaha la doortay. Dan-wadaagayaasha barnaamijka tijaabada waxay aqoonsadeen macluumaad muhiim ah, faahfaahin hawlgal, iyo su'aalo suurtagal ah si loo diyaariyo qaybahan. Su'aalo dheeri ah oo aan looga hadlin buug-gacmeedkan waxaa loo gudbin karaa Taageerada Farsamada telefoon ahaan 206-492-5249 ama iimayl ahaan BSKwageboost@imaginewa.org.

Boosaska La Heli Karo ee Barnaamijka Tijaabada

Markii ay soo gudbisanaayeen arijooga, xarumuhu waxay bixiyeen tirada shaqaalaha hadda jira iyo tirada loo baahan yahay si xaruntu u noqoto mid buuxda. Xarumaha lagu doortay habka bakhtiyaa-nasiibka ah ama liiska sugitaanka ku jira waxaa loo qoondeeyaa tiro boosaska shaqaalaha ah iyadoo lagu saleynayo xogtaas arjiga ku jirta.

Si loo siiyo xarumaha ikhtiyaaro dheeri ah marka ay maareynayaan isbeddellada shaqaalaha, barnaamijka Tijaabada wuxuu u oggolaanayaa xarun kasta inay hayso ilaa laba (2) boos oo bannaan mar kasta, iyadoo aan wax ciqaab ah lagu saarin haddii si ku-meelgaar ah aan loo buuxin.

Boosas kasta oo bannaan oo ka badan xadka 2-da boos waxaa si toos ah dib loogu qaadan doonaa maalinta shaqada ee ugu horreysa ee rubuc kasta oo cusub, kadibna dib ayaa loo qaybin doonaa haddii loo baahdo.



Tusaale: Barnaamijkaaga waxaa loo oggolaaday 6 boos.

- Waxaad isticmaalaysaa 3 boos (adiga + 2 shaqaale).
- Weli waxaad haysataa 3 boos oo aan la isticmaalin.
- Waxaad hayn kartaa 2 ka mid ah boosaskaas bannaan.
- 1 boos oo dheeri ah ayaa lagaa qaadi doonaa bilowga rubuca xiga haddii aan la buuxin.

XARUNTA

Dib-u-eegista Boosaska La Heli Karo ee Xaruntaada

Markii xarun lagu doorto hab bakhtiyaa-nasiib ah ama laga soo doorto liiska sugitaanka si ay ugu biirto barnaamijka, wakiilka xarunta wuxuu heli doonaa ogeysiis si uu u dhammaystiro diiwaangelinta xarunta. Inta lagu jiro diiwaangelinta, wakiilka wuxuu arki doonaa tirada boosaska shaqaalaha ee loo qoondeeyay iyadoo lagu saleynayo xogtii la gudbiyay. Waqtigan, wakiilku wuxuu ku dari doonaa shaqaalaha liiska.

Haddii aysan buuxin dhammaan boosaska waqtigaas, wakiilka xarunta wuxuu heli doonaa ogeysiis xasuusin ah oo ku saabsan boosaska haray. Ogeysiisyadu waxay ka koobnaan doonaan link-ki gaar ah oo laga eegi karo macluumaadka boosaska haray. Kooxda Taageerada Farsamada ee Imagine Instute sidoo kale waxay awood u leeyihiin inay dib u diraan link-gaan gaarka ah haddii la waayo.

Haddii uu shaqaale ka tago xarun kadib markii la doorto barnaamijka Tijaabada

Haddii xaruntaadu la kulanto is-bedbedel shaqaale inta lagu guda jiro barnaamijka Tijaabada, ama haddii shaqaale diido inuu isdiiwaangaliyo, booska bannaan wuxuu noqdaa boos aan la isticmaalin. Xarumuhu waxay hayn karaan ilaa laba boos oo bannaan mar kasta. Boos kasta oo ka badan xadkaas waxaa dib loo qaadan doonaa maalinta shaqada ee ugu horreysa ee rubuca xiga kadib marka shaqaaluhu ka tago.

Wakiilka xarunta waxaa la ogeysiin doonaa in boos bannaan uu jiro, waxaana la siin doonaa link-ki si uu ugu soo daro shaqaale cusub macluumaadkiisa. Shaqaalaha cusub waxaa loo diri doonaa link-ki uu ku isaga diiwaangaliyo barnaamijka tijaabada, waxaana la siin doonaa ikhtiyaar uu ku aqbalo ama uu ku diido.

SHAQAALE

Shaqaalaha ka shaqeeya xarumo badan oo la doortay

Nidaamka lacag-bixinta ee barnaamijka Tijaabada ma awoodi karo inuu bixiyo laba lacag oo waqtiga-kooban ah ee shaqaale ka shaqeeya laba xarumood oo kala duwan. Shaqaaluhu waxay dooran doonaan inay ka iska diiwaangaliyaan hal xarun oo keliya, waxayna heli karaan hal lacag-bixin oo waqtiga-kooban ah.

Haddii shaqaale uu u wareego shaqo xarun kale oo ka mid ah xarumaha ka qaybta ka ah barnaamijka, diiwaangelintiisa barnaamijka waa la joojinayaa. Diiwaangelintu kama wareegto xarun ilaa xarun kale. Tusaale ahaan, haddii shaqaale ka guuro xarun ku taal Bellevue una guuro mid ku taal Renton oo isla xarun carruur ah ka tirsan, ma sii wadanayo ka-qaybgalka barnaamijka. Barnaamijku wuxuu doortaa xarumaha iyo shaqaalaha ka shaqeeya meelahaas. Shaqaalaha cusub ee ka bilaaba xarumaha ka qaybgalaya waxaa mar kale lagu casuumi karaa inay diiwaangashadaan haddii boosaska la heli karo. Wixii macluumaad dheeri ah, ka eeg qaybta Ka-tagista Shaqada ama Beddelashada Xarunta

U-qalmitaanka Barnaamijka iyo Diiwaangelinta

Barnaamijka Tijaabada Best Starts ee kordhinta mushaharka daryeelka carruurta wuxuu bilaabmay horraantii 2025 iyadoo la sameeyay hal wareeg arji ah si loo doorto xarumaha ka qaybgalaya barnaamijka. Kadib markii kooxdii ugu horreysay la doortay, dhammaan xarumaha kale ee u qalma waxaa lagu daray liiska sugitaanka.

Bishii Janaayo 2026, barnaamijka Tijaabada waala balaariyay si loogu ugu daro xarumo dheeri ah, waxaana xarumaha liiska sugitaanka lagu casuumay inay is diiwaangeliyaan iyadoo loo marayo hab bakhtiyaa-nasiib ah. Haddii maalgelintu saamaxdo, xarumo kale ayaa lagu casuumi doonaa mustaqbalka.

XARUNTA

Markii xarun lagu doorto hab bakhtiyaa-nasiib ah si ay ugu biirto barnaamijka, wakiillada xarunta waxaa la siin doonaa ogeysiis lagu weydiinayo inay dhammaystiraan diiwaangelinta xarunta.

Shuruudaha Shaqaalaha iyo Awoodda

Haddii xarun la doorto, shaqaalaha ka shaqeeya xaruntaas waxay u qalmaan inay ka qayb qaataan barnaamijka tijaabada, iyada oo aan loo eegin tirada carruurta ee hadda ku jirta, ilaa ugu yaraan hal cunug uu ku jiro barnaamijka. Intii lagu guda jiray arjigii 2025, waxaa la codsaday tirada shaqaalaha loo baahan yahay si xaruntu u gaarto awood buuxda. Tiradan ayaa loo adeegsaday in lagu go'aamiyo inta boos ee la siinayo xarunta. Boosaska shaqaalaha ee aan la buuxin ayaa lagu darayaa tirada guud ee boosaska la bixiyay.

Diiwaangelinta Wakiilka Xarunta

Si ay uga qayb qaataan, wakiillada xarumaha waa inay naftooda ku daraan liiska shaqaalaha si ay u helaan kordhinta mushaharka. Tani waxay xaqiijineysaa in si sax ah loogu daro nidaamka lacag-bixinta, ay helaan macluumaadka diiwaangelinta, isla markaana ay heli karaan xogta ama warbixinnada la xiriira xarunta.

SHAQAALE

Dhammaan shaqaalaha waxay haystaan 45 maalmood si ay isugu diiwaangeliyaan barnaamijka, laga bilaabo taariikhda ay helaan casuumaadda (iimayl ama fariin). Casuumaaddu waxay ka kooban tahay faahfaahinta sida loo buuxiyo foomka isdiiwaangelinta. Shaqaale kasta waa inuu buuxiyaa foomkan si uu uga qayb qaato. Haddii shaqaale uusan buuxin foomka 45 maalmood gudahood,uma qalmo ka qeybgalka barnaamijka, haddii uusan bixin fursado kale oo diiwaangelin ah barnaamijka Tijaabada.

Shaqaalaha Fasax Muddo Dheer ah oo La Ansixiyay

Shaqaalaha ku jira fasax aan lagu ciqaabi karin oo aan awoodin inay is-diiwaangeliyaan muddada rasmiga ah, waxay u qalmaan inay is-diiwaangeliyaan marka ay shaqada ku soo noqdaan. Sharciga Gobolka Washington wuxuu oggolaanayaa fasaxyo aan shaqaalaha lagu ciqaabi karin oo ay ka mid yihiin:

- Fasaxa Xanuunsashada ee Lacagta Mudan [https://www.lni.wa.gov/workers-rights/leave/paid-sick-leave/index]
- Xeerka Daryeelka Qoyska [https://www.lni.wa.gov/workers-rights/leave/family-care-act]

- Fasax Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka leh [https://www.lni.wa.gov/workers-rights/leave/paid-family-and-medical-leave] – waxaa maamula Waaxda Amniga Shaqada [https://esd.wa.gov/]
- Fasaxa Rabshadaha Qoyska [https://www.lni.wa.gov/workers-rights/leave/domestic-violence-leave]
- Fasax Uurka iyo Naafada [https://www.hum.wa.gov/employment/disability-employment]– oo ay maamusho Guddiga Xuquuqda Aadanaha [https://www.hum.wa.gov/]
- Adeegyada Degdegga ah iyo Fasaxa Xaaska Milatariga [https://www.lni.wa.gov/workers-rights/leave/leave-for-military-spouses-and-certain-emergency-personnel]

Ilaalinta U-qalmitaanka Barnaamijka

Xarumaha loo doortay inay ka qeybgalaan barnaamijka Tijaabada, iyo shaqaalaha is diiwaangeliyay waa inay kusii socdaan oo aanay jabin shuruudaha aasaasiga ah si ay u sii helaan lacagaha.

XARUNTA

Si ay u sii ahaadaan kuwo u qalma barnaamijka, xaruumaha waxaa laga filayaa inay ilaaliyaan habraacyada hoos ku xusan inta ay ka qeybqaadanayaan barnaamijka Tijaabada:

- Inay ilaaliyaan u-qalmitaanka aasaasiga ah
- In dhammaan xogta MERIT ay ahaato tii ugu dambeysay, oo ay ku jiraan shaqaalaha cusub iyo kuwa tagay.
- In diiwaannada shaqaalaha sax ahaadaan, isla markaana ogeysiiyaan Taageerada Farsamada haddii shaqaale baxo. Xarumuhu waxay mas'uul ka yihiin ogeysiiska kooxda Caawinta Farsamada haddii shaqeel diiwaangashan uu ka tago xarunta.
- Dhammaystiraan liiska shaqaalaha markii la doorto habka baqtiyaa-nasiibka ama lagala soo baxo liiska sugitaanka.
- Buuxiyaan oo ay soo gudbiyaan sahannada xaqiijinta saddexdii biloodba mar (u dir iimay iyo qoraal dhammaadka rubuc kasta)
- In aanay loo isticmaalin ka qaybgalka barnaamijka Tijaabada si loo go'aamiyo mushaharka iyo/ama faa'iidooyinka shaqaalaha, lana dhimin mushaharka, faa'iidooyinka, kordhinta qorshaysan ama gunnooyinka, ama shuruudaha shaqada inta lagu jiro barnaamijkaan Tijaabada
- Warbixinta xiritaanka ama isbeddelada waaweyn ee hawlaha ee loo diray Dan-wadaagayaasha barnaamijka Tijaabada

Haddii aan la raacin mid ka mid ah qodobada kor ku xusan waxay keeni kartaa dib u dhac ku yimaada lacag-bixinta ama ka saarid barnaamijka Tijaabada ah.

Xiritaanka Xarumaha

Xarumaha ayaa mas'uul ka ah ogeysiinta kooxda Taageerada Farsamada haddii barnaamijkooda si joogto ah ama ku meel gaar ah uu u istaago.

Haddii xaruntu si joogto ah u xiranto, xarunta iyo shaqaalaheeda uma qalmaan iney ka qayb qaataan barnaamijka Tijaabada. Wakiilka xarunta ayaa heli doona sahanka baxitaanka, barnaamijkana waxaa laga saari doonaa Tijaabada. Iyadoo ku xiran taariikhda xiritaanka xarunta, shaqaalaha diiwaangashan waxay heli karaan lacagta saddexdii biloodba mar.

Haddii xaruntu si ku-meelgaar ah u xiranto iyadoo aan waafaqsanayn Xeerka Maamulka Washington WAC 110-300-0016, xarunta iyo shaqaalaheeda waxay sii ahaanayaan kuwa u qalma barnaamijka Tijaabada.

Filashooyinka ku saabsan Mushaharka iyo Faa'iidooyinka Shaqaalaha

Xarumuhu ma dhimi karaan ama si taban uma beddeli karaan mushaharka ama faa’iidooyinka shaqaalaha sabab la xiriirta ka-qaybgalka barnaamijka Tijaabada ee Best Starts Child Care Wage Boost. Xarun kasta oo lagu ogaado inay wax ka beddeshay dhaqamadeeda sababta ka-qaybgalka Barnaamijka Tijaabada waxay lumin kartaa u-qalmitaanka waxaana laga joojin karaa ka qeybqaadashada Barnaamijka. Haddii aad tahay shaqaale ka shaqeeya xarun la doortay oo mushaharkaaga ama faa’iidooyinkaaga la dhimay, fadlan arrintan ku soo wargeli qeybta Taageerada Farsamada lambarkan 206-492-5249 ama iimaylkan BSKwageboost@imaginewa.org.

Xeerka Ka-joojinta ka-qaybgalka Barnaamijka

Barnaamijkan waxaa loogu talagalay inuu taageero badqabka ka adeeg-bixiyeyaasha daryeelka carruurta iyo qoysaska ay daryeelaan. Sidaas aadeedeed, waxaan xaq u leenahay inaan joojino diiwaangelintaada barnaamijkan sababahan soo socda midkood:

- Haddii xaruntu si joogto ah u xiranto
- Haddii aad si ikhtiyaari ah uga baxdo barnaamijka
- Haddii aad si ula kac ah u bixiso macluumaad khaldan oo ku saabsan aqoonsigaaga ama u-qalmitaankaaga Barnaamijka Tijaabada
- Haddii aad sameyso rabshad ama aad hanjabaad tacadi u geysato shaqaalaha mashruuca, oo ay ku jiraan hanjabaado lagu sameeyo telefoon, iimayl, fariin qoraal ah ama si fool-ka-fool ah
- Haddii shaqadaada xarun u qalanta barnaamijka la joojiyo

- Haddii aadan mar dambe buuxin shuruudaha ka-qaybgalka barnaamijka Tijaabada Best Starts for Kids ee kordhinta mushaharka daryeelka carruurta

Ka saarista barnaamijka waxay ka dhigan tahay inaadan mar dambe heli doonin lacag-bixinta rubuc kasta. Waxaa lagugu soo wargelin doonaa qoraal ahaan haddii ka-qaybahaanshahaaga la joojiyo.

SHAQAALE

Si ay u sii ahaadaan kuwo u qalma barnaamijka, shaqaaluhu waa inay ilaaliyaan dhaqamada soo socda inta ay ka qayb qaadanayaan Barnaamijka Tijaabada:

- Iney sii ilaaliyaan u-qalmitaanka aasaasiga ah
- Dhammaystiraan sahannada rubuc kasta ee ku saabsan xaaladda shaqadooda
- Ay ugu gudbiyaan Dan-wadaagayaasha Barnaamijka lambarkan 206-492-5249 ama iimaylkan bskwageboost@imaginewa.org, haddii ay dhacaan waxyaabahan:
    - Isbeddello ku yimaada mushaharka, faa'iidooyinka, ama sida loola dhaqmo ee xarunta sabab la xiriirta ka-qaybgalka Barnaamijka Tijaabada
    - Isbeddello ku yimaada u-qalmitaanka
    - Isbeddello ku yimaada macluumaadka xiriirka
    - Isbeddello ku yimaada habka lacag-bixinta, sida lambarka akoon cusub

Hadii aad la xiriiri weyso Dan-wadaagayaasha Barnaamijka oo aad soo sheegi weyso isbeddellada waxay keeni kartaa dib u dhac lacag-bixin ama in lagaa saaro Barnaamijka Tijaabada

Isbeddellada Xaaladda Shaqada

Isbeddelada heerka shaqo ee waqti-buuxa ama waqti-kooban

Sahanka xaqiijinta rubuc sanadeed kasta wuxuu weydiin doonaa isbeddellada xaaladda shaqada si si fiican loo fahmo isbeddellada shaqaalaha ee xarumaha barnaamijka Tijaabada. Beddelidda xaaladda shaqaalaha ee waqti-buuxa ilaa waqti-kooban, ama waqti-kooban ilaa waqti-buuxa, ma beddeli doonto qadarka lacagta rubuc sanadeed kasta ee uu shaqaaluhu helo.

Ka Bixitaan Ikhtiyaari ah ama Ka-qayqaadasho La'aan

Go'aansashada inaadan is diiwaangelin

Marka aad doorato inaadan is diiwaangelin, waxaad dooranaysaa inaadan helin lacagaha Wage Boost. Shaqaaluhu waxay ka bixi karaan iyagoo isticmaalaya casuumaadda loo diray. Haddii casuumaadda aan laga jawaabin 45 maalmood gudahood, way dhacaysaa, shaqaaluhuna uma qalmo ka-qaybgalka Barnaamijka. Haddii aad doorato inaadan is diiwaangelin, mar dambe dib uguma biiri kartid barnaamijka Tijaabada.

Ka tagista shaqadaada ama u wareegista xarun kale

Haddii aad ka tagto shaqadaada xarun ka diiwaangashan Tijaabada, waxaad luminaysaa u-qalmitaanka ka-qaybgalka Tijaabada. Haddii aad shaqo ka hesho xarun cusub oo qayb ka ah Pilot-ka, waxaad u qalmi kartaa Tijaabada haddii dhammaan shuruudahan la buuxiyo:

- Xaruntu waxay qayb ka tahay Tijaabada.
- Waxaad buuxisaa shuruudaha aasaasiga ah ee u-qalmitaanka.
- Boos bannaan ayaa ka jira liiska shaqaalaha ee xarunta.

Lama dammaanad qaadayo in boos bannaan la heli doono. **Fadlan la xiriir Imagine Institute haddii aad u wareegtay xarun kale.**

Marka shaqaale uu ka tago xarun ama uu u wareego xarun kale, waxaa laga yaabaa inaad weli u qalanto lacag-bixin, iyadoo ku xiran taariikhda aad ka baxday shaqada, oo ah maalinta ugu dambeysa ee aad ka shaqaysay xarun ka qaybqaadanaysa Tijaabada. Haddii shaqaale ama xarun ay soo sheegaan in shaqaaluhu ka tagay xarunta ama uu shaqeeyo wax ka yar 10 saacadood toddobaadkii, waxaan codsanaynaa maalinta ugu dambeysa ee shaqada si loo go'aamiyo in shaqaaluhu u qalmo lacag-bixin. Si uu ugu qalmo lacag-bixinta rubucaas, shaqaaluhu waa inuu weli shaqaynayaa maalinta 1-aad ee bisha ugu dambeysa ee rubucaas ama ka dib.

- Tusaale u qalma**:** Maalinta ugu dambeysa ee shaqadu waa Maarso 10, 2026 → wuxuu u qalmaa lacag-bixinta rubuca 1-aad ee 2026, sababtoo ah wuxuu shaqeeyay ka dib Maarso 1.
- Tusaale aan u qalmin**:** Maalinta ugu dambeysa ee shaqadu waa Febraayo 15, 2026 → uma qalmo lacag-bixinta rubuca 1-aad ee 2026, sababtoo ah wuxuu joojiyay shaqada ka hor Maarso 1.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan lacag-bixinta, fadlan la xiriir Imagine Institute.

La-talin Ku Saabsan Canshuuraha iyo Faa'iidooyinka

Saameynta canshuuraha

Kordhinta mushaharka waxaa loo tixgeliyaa dakhli la canshuuro, ka-qaybgalayaashuna waxay heli doonaan foomka 1099 sannad kasta oo canshuureed oo ay ka bixiyaan lacagaha ay ka helaan barnaamijka Tijaabada. **Canshuurta dakhliga lagama jarayo lacagaha barnaamijka Tijaabada.** Waxaan ku dhiirrigelineynaa dhammaan shaqaalaha raba iney ka qeybqaataan barmaanijka inay la hadlaan khabiir canshuureed ka hor inta

aysan is diiwaangelin si ay u fahmaan saameynta suurtagalka ah ee canshuurta ee xaaladooda gaarka ah.

Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa halkan: https://bskwageboost.imaginewa.org/toolkit/

Saameynta faa'iidooyinka ku saleysan dakhliga

Faa'iidooyinka ku saleysan dakhliga waxay leeyihiin xeerar iyo nidaamyo kala duwan oo ku saabsan sida dadka ay ugu qalmaan. Haddii aad hadda qaadato faa'iidooyin ku saleysan dakhliga, waxaan kugula talineynaa inaad la xiriirto maamulka faa'iidooyinka ka hor intaadan is diiwaangelin si aad u fahanto saameynta suurtagalka ah ee faa'iidooyinkaaga.

The Imagine Institute wuxuu caawin doonaa ka-qaybgalayaasha isagoo bixinaya la-talin aasaasi ah oo ku saabsan faa'iidooyinka, isla markaana siin doona macluumaad iyo adeegyo ka caawinaya ka jawaabidda su'aalaha caadiga ah, oo ay ku jiraan kuwa la xiriira canshuuraha. Inkastoo The Imagine Institute uu doonayo inuu taageero shaqaalaha isagoo siinaya macluumaad si fudud loo heli karo, waxaa si xooggan loogu talinayaa in ka-qaybgalayaashu la tashadaan maamulayaashooda kiisaska, la-taliyeyaasha maaliyadeed, ama hay'adaha bixiya faa'iidooyinka si ay u helaan talo gaar ah oo ku habboon xaaladdooda dhaqaale ee gaarka ah.

Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa halkan: https://bskwageboost.imaginewa.org/toolkit/

Lacag-bixinta

Ka-qaybgalayaasha diiwaangashan waxay heli doonaan lacag-bixin rubuc sanadeed kasta si loo bixiyo baqshiish dheeri ah oo u eg mushahar kordhin. Qadarka kordhinta mushaharka waxaa lagu saleeyay talooyinka bulshada si uu ugu ekaado kordhin $4 saacaddii. Shaqaalaha waqtiga-buuxa, kuwa shaqeeya celcelis ahaan 25–40 saacadood usbuucii, waxay heli doonaan $2,080 rubuc sanadeed kasta. Shaqaalaha waqtiga-kooban, kuwa shaqeeya celcelis ahaan 10–24 saacadood usbuucii, waxay heli doonaan $1,040 rubuc sanadeed kasta.

Joogtaynta Lacag-bixinta

Lacagaha lacagaha waxaa la bixiyaa saddexdii biloodba mar ilaa 2027. Jadwalka lacag-bixinta ka eeg qaybta Jadwalka Lacag-bixinta Saddexdii Biloodba Mar

Habka lacag-bixinta

Shaqaalaha ku jira barnaamijka Tijaabada waxay dooran karaan in lacagta si toos ah loogu shubo akoonkooda bangiga ama ay doortaan in kaarka debit-ka ee horay loo sii shubay

loogu soo diro. Marka laga shaqeysiiyo, kaarka debit-ka waxaa lagu shubayaa lacagta, waxaana loo isticmaali karaa sida kaar debit caadi ah.

U-qalmitaanka Lacag-bixinta Saddexdii Biloodba Mar

U-qalmitaanka lacag-bixinta rubuc sanadeed kasta wuxuu ku xiran yahay muddada uu shaqeeyay shaqaalaha, iyo xaaladda diiwaangelinta xarunta. U-qalmitaanka waxaa lagu qiimeeyaa rubuc sanadeed kasta iyadoo lagu saleynayo in shuruudaha la buuxiyay muddadaas.

U-qalmitaankaaga lacag-bixinta rubuc sanadeedka wuxuu ku xiran yahay taariikhda aad bilowday, maalmaha aad shaqeysay, iyo diiwaangelinta xaruntaada ee barnaamijka Tijaabada.

Si aad u hesho lacag-bixin rubuc sanadeedka, dhammaan afarta shuruudood ee soo socda waa inay sax noqdaan:

1. Taariikhdaada bilowga
    - Waa inaad shaqada ka bilowday xaruntaada la doortay maalinta koowaad ee bisha saddexaad ee rubucaas ama ka hor.
2. Maalmaha shaqada inta lagu guda jiray rubuc sanadeedka
   Waa inaad shaqeysaa:
    - Labada bilood ee ugu horreeya ee rubuc sanadeedka oo buuxa, iyo
    - Maalintii ugu horreysay ee bisha ugu dambeysa ee rubuc sanadeedka.
3. Diiwaangelinta xarunta
    - Xaruntaadu waa inay is diiwaangelisay rubuca sanadeedkaas ama ka hor

4. Diiwaangelinta shaqaalaha

Shaqaaluhu waa inuu si buuxda u dhammaystiray diiwaangelinta, taasoo micnaheedu yahay in la ansixiyay oo uu helay warqadda diiwaangelinta, ka hor taariikhda lacag-bixinta rubuc sanadeedkaas.

Haddii mid ka mid ah shuruudahan aan la buuxin, ma u qalantid lacag-bixinta rubuc sanadeedkaas.

Tusaale

Si aad u hesho lacag bixinta Rubuc Sanadeedka 3aad (Luulyo - Sebteembar):

- Taariikhda aad shaqada bilowday waa inay noqotaa Sebtembar 1 ama ka hor
- Waa inaad shaqeysaa dhammaan bilaha Luulyo iyo Agoosto, iyo ilaa 1-da Sebteembar

- Xaruntaadu waa inay is diiwaangelisay rubuc sanadeedka 3aad ama ka horr
- Waa inaad si buuxda u dhammaystirtay isdiiwaangelinta ka hor taariikhda lacag-bixinta ee 30-ka Oktoobar

Haddii xaruntaadu is diiwaangeliso Oktoobar (Rubuc Sanadeedka 4aad), ma u qalantid lacag-bixinta Rubuc Sanadeedka 3aad xitaa haddii aad buuxiso shuruudaha kale.



Jadwalka Bixinta Saddexdii Biloodba Mar

Lacag-bixinta Rubuc Sanadeedka	Taariikhda Lacag-bixinta	Shaqaaluhu waa in taariikhda bilowgiisa ahaataa ama ka hor
Rubuc Sanadeedka 4aad ee 2025 (Oktoobar, Nofeembar, Diseembar)	30-ka Janaayo, 2026 (31-ka Janaayo waa Sabti)	Diseembar 1-aad, 2025
Rubuc Sanadeedka 1aad ee 2026 (Janaayo, Febraayo, Maarso)	30-ka Abriil, 2026	Maarso 1-aad, 2026
Rubuc Sanadeedka 2aad ee 2026 (Abriil, May, Juun)	31-da Luulyo, 2026	Juun 1-aad, 2026
Rubuc Sanadeedka 3aad ee 2026 (Luulyo, Agoosto, Sebteembar)	30-ka Oktoobar, 2026 (31-da Oktoobar waa Sabti)	1 –da Sebtembar, 2026

Rubuc Sanadeedka 4aad ee 2026 (Oktoobar, Nofeembar, Diseembar)	29-ka Janaayo, 2027 (31-da Janaayo waa Axad)	1-da Diseembar, 2026
Rubuc Sanadeedka 1aad ee 2027 (Janaayo, Febraayo, Maarso)	30-ka Abriil, 2027	1-da Maarso, 2027
Rubuc Sanadeedka 2aad ee 2027 (Abriil, May, Juun)	Luulyo 30, 2027 (31-da Luulyo waa Sabti)	1-da Juun, 2027
Rubuc Sanadeedka 3aad ee 2027 (Luulyo, Agoosto, Sebteembar)	29-ka Oktoobar, 2027 (31-da Oktoobar waa Axad)	1-da Sebteembar, 2027

Maareynta waxyaalaha laga bedelay iyo dhibaatooyinka lacag-bixinta

Isbeddelada Macluumaadka Bangiyada ama Lacag-bixinta

Haddii aad u baahan tahay inaad cusboonaysiiso macluumaadka bangigaaga ama aad beddesho habka lacag-bixinta, fadlan la xiriir Taageerada Farsamada adigoo wacaya 206-492-5249 ama iimayl ugu diraya BSKwageboost@imaginewa.org

Imagine waxay kuu soo diri doontaa foom aad ku dooranayso habkaaga cusub ee lacag-bixinta. Marka isbeddelka la farsameeyo, dhammaan lacagaha mustaqbalka waxaa lagu bixin doonaa habka cusub ee aad dooratay.

Soo celinta lacag si khalad ah aad ku heshay

Maalgelinta Barnaamijkan waxay ka timid canshuurta Best Starts for Kids ee ay cusboonaysiiyeen codbixiyeyaasha King County sanadkii 2021. Lacagahan dadweynaha waxay ka yimaadeen King County, waxaana qaybinaya dan-wadaagaha lacag-bixinta ee Barnaamijka Tijaabada, AidKit Inc. Lacagaha si khalad ah loo bixiyo sabab la xiriirta isbeddelka u-qalmitaanka ama bixinta xad-dhaafka ah waxaa laga yaabaa in loo baahdo in dib loogu celiyo King County. Lacag kasta oo la bixiyo iyadoo la isticmaalayo macluumaad been abuur ah waa in dib loogu celiyaa King County. Dan-wadaagayaasha Barnaamijka ayaa bixin doona tilmaamo iyo macluumaad dheeri ah haddii arrin noocan ah dhacdo.

Xaddidaadaha ku saabsan sida aad u isticmaali karto lacagaha

Shaqaaluhu iyagaa go'aamin kara sida ay u isticmaalaan magdhowga dheeraadka ah. Ma jiraan wax xaddidaad ah oo ku saabsan lacagahan, shaqaaluhuna waa xor inay doortaan sida ay u isticmaalaan. Shaqaaluhu lagama rabo inay soo sheegaan ama la wadaagaan macluumaad ku saabsan isticmaalka lacagta Best Starts for Kids ama Dan-wadaagayaasha Barnaamijka.

Sahanno ikhtiyaari ah ama kooxo dood ah ayaa laga yaabaa inay weydiiyaan su'aalo ku saabsan sida lacagta loo isticmaalay, balse ka jawaabista su'aalahan waa gebi ahaanba ikhtiyaari.

Maxaa dhacaya haddii lacag-bixintu istaagto oo ay u muuqato inuu qalad jiro?

La xiriir qeybta Taageerada Farsamada adigoo wacaya 206-492-5249 ama iimayl ugu diraya BSKwageboost@imaginewa.org haddii aad qabto su'aalo ku saabsan lacag-bixin istaagtay oo aad u maleyneyso inuu qalad

Macluumaadka Bangiga Iyo Asturnaanta

Doorka AidKit ee Barnaamijka Tijaabada

AidKit, Inc. waa dan-wadaagaha tiknoolajiyada iyo lacag-bixinta ee Barnaamijka Tijaabada Best Starts for Kids ee Mushaar Kordhinta Daryeelka Carruurta. Waxay ururisaa oo isticmaashaa macluumaadkaaga shakhsiyeed si loo go'aamiyo u-qalmitaanka, loo farsameeyo lacag-bixinta, loo qiimeeyo saameynta Barnaamijka, loona hagaajiyo waxtarkiisa.

Macluumaadka shaqsiga ee ay ururiso AidKit

AidKit waxay ururin kartaa macluumaadka sida:

- Magacaaga iyo macluumaadkaaga xiriirka
- Faahfaahinta shaqada
- Xogtaada shaqsiyeed sida da'da, iwm.
- Dukumiintiyada xaqiijinta aqoonsiga, oo ay ku jiraan aqoonsi dowladeed iyo sawir selfi ah

Macluumaadkaaga waxaa si sugan loola wadaagi doonaa King County iyo The Imagine Institute iyadoo qayb ka ah Barnaamijka Tijaabada. AidKit waxay hubisaa in xogtaada la ilaaliyo mana iibin doonto ama uma isticmaali doonto ujeeddooyin ganacsi.

Meesha iyo sida macluumaadka bangiga loo kaydiyo loona ilaaliyo

AidKit waxay ilaalisaa xogta xasaasiga ah sida lambarka sooshal sekuuritiga iyo lambarka akoonka bangiga iyadoo adeegsanaysa habab sirayn xooggan oo si weyn loo aaminsan yahay. Kaliya maamulayaasha la oggolaaday ayaa furi kara xogta xasaasiga ah, waxaana si joogto ah loo xaqiijiyaa gelitaankooda si loo hubiyo in kaliya shaqaalaha ku habboon ay helaan xogta. Mar kasta oo xog la furo, waxaa lagu diiwaangeliyaa si dib-u-eegis iyo isla-xisaabtan loo sameeyo.

Sida AidKit ay u ilaaliso macluumaadka shaqsiga

AidKit waxay isticmaashaa tallaabooyin amni oo xooggan si ay u ilaaliso xogtaada, waxayna haynaysaa kaliya inta ay u baahan tahay Barnaamijku ama sharcigu. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay in lagugu wargeliyo haddii jebin xogeed ay dhacdo oo saameyso macluumaadkaaga.

Dib-u-eegista ama sixitaanka macluumaadka shaqsiga

Waxaad dib u eegi kartaa ama codsan kartaa in la saxo macluumaadkaaga adigoo kala xiriiraya AidKit iimaylkan AidKit at privacy@aidkit.cloud.

Ka noqoshada oggolaanshaha wadaagista macluumaadka shaqsiga

Waxaad ka noqon kartaa oggolaanshahaaga wakhti kasta adigoo kala xiriiraya AidKit iimaylkan privacy@aidkit.cloud. Si kastaba ha ahaatee, ka noqoshada oggolaanshaha waxay saameyn kartaa awooddaada ka-qaybgalka Barnaamijka Tijaabada.

Walaacyada ku saabsan asturnaanta macluumaadka

Haddii aad qabto walaac, su'aalo, ama aad u baahan tahay caawimaad ku saabsan xogtaada ama asturnaanta, waxaad kala xiriiri kartaa AidKit iimaylkan privacy@aidkit.cloud.

Sida Loo Isticmaalo Kaarkaaga Debit-ka

Haddii aad dooratay inaad lacagaha ku hesho kaar debit halkii laguu shubi lahaa akoon bangi, waxaa lagu siin doonaa kaar la yiraahdo "GiveCard". GiveCard waa kaar debit hore loo sii shubay oo ka tirsan Mastercard, wuxuuna u shaqeeyaa sida kaar debit caadi ah.

Waqtiga aad ku heleyso kaarka debit-ka oo laguu gilinaayo boostada

Marka diiwaangelintaada la ansixiyo, waxay qaadan doontaa qiyaastii 7 maalmood ee maalmaha shaqada si aad ku hesho boostada. Waa inaad xaqiijisaa inaad heshay kaarka si aad u hesho lacagaha. Marka kaarka la geeyo, waxaad heli doontaa ogeysiis leh tilmaamo ku saabsan sida loo xaqiijiyo.

Macluumaadka Guud ee Kaarka

Waa inaad xaqiijisaa helitaanka GiveCard si lacagaha loogu bilaabo in lagu shubo. Waa inaad dejisaa PIN-ka hor intaadan kaarka ka isticmaalin ATM.

GiveCard waxaa lagu isticmaali karaa meel kasta oo aqbasha Mastercard debit. Waxaad u isticmaali kartaa dukaamada ama onlayn.

Waxaa lagu talinayaa inaad hayso warqadda uu kaarka ku xiran yahay, maadaama ay ku jirto macluumaad muhiim ah haddii kaarka lumo ama la xado.

Waxaad heli doontaa shabakad ka kooban 80,000 ATM oo aan lahayn khidmad. Waxaad ka arki kartaa halkan: https://www.moneypass.com/atm-locator.html

Markaad kaarka ka isticmaalayso dukaanka, mararka qaar waxaa lagu weydiin karaa PIN. Haddii aadan dejin PIN, riix badhanka cagaaran ee “OK” si aad u sii waddo oo aad uga booddo gelinta PIN-ka.

Ku-xiritaanka PIN-ka

Haddii aad rabto inaad lacag kala baxdo ATM, waxaad u baahan doontaa PIN (badanaa 4 ama 6 lambar).

Markaad dooranayso PIN, ha isticmaalin lambarro la xiriira taariikhda dhalashada, cinwaanka, ama lambarka sooshal sekuuritiga, maadaama si fudud loo qiyaasi karo. PIN waa in maskaxda lagu hayaa, oon aan lala wadaagin cid kale.

Ha ku qorin PIN-ka kaarka, hana ku kaydin meel la mid ah kaarka. Kaarka ula dhaqan sida lacag caddaan ah, mar walbana ku hay meel ammaan ah. Haku dirin lambarka kaarka iimayl ama fariin qoraal ahaan. Marka aad onlayn ku isticmaalayso, hubi astaanta qufulka si aad u xaqiijiso in websaydku ammaan yahay.

Fiirinta haraagaaga

Si aad u hubiso inta lacag ah ee ku jirta kaarka, booqo [givecard.io/support]. Halkaas waxaad:

- Ka hubin kartaa haraagaaga (tusaale,lacagta ku jirta kaarkaaga inta ay dhantahay)
- Kaga xiri kartaa lambarka PIN-ka kaarkaaga ikhtiyaariga ah
- Ka heli kartaa ATM-yada kuu dhow
- Ka abuuri kartaa akoon si aad u aragto taariikhda isticmaalka

Haddii aadan geli karin websaydka kor ku xusan, waxaad ka wici kartaa GiveCard lambarka 908-529-0955.

Helidda taageero ku saabsan kaarkaaga GiveCard

Haddii aad dhibaatooyin kala kulanto kaarkaaga, fadlan la xiriir qeybta taageerada GiveCard adigoo isticmaalaya:

- Iimayl: support@givecard.io, ama
- Wacaya: 908-529-0955.

Saacadaha taageeradu waa 8-da subaxnimo ilaa 5-ta galabnimo (MST). Intaas gudaheed si degdeg ah ayaa looga jawaabaa. Waqtiyada kale waxaa laga yaabaa in jawaabtu dib u dhacdo. Marka laga baxo 8 subaxnimo ilaa 5 galabnimo MST, kooxdooda taageerada ayaa sida ugu dhaqsaha badan kula soo xiriiri doonta, hase yeeshee tani mar walba ma noqon karto mid degdeg ah.

Kaararka Lumay ama La Xaday

Haddii aad aaminsan tahay in kaarkaaga uu lumay ama la xaday, la xiriir qeybta Taageerada GiveCard adigoo isla markiiba wacaya 908-529-0955 oo xir kaarkaaga adigoo isticmaalaya bogga hayaha kaararka [http://givecard.io/support].

Kooxda GiveCard waxay xiri doonaan kaarkaaga si ay u ilaaliyaan lacagaha ku jiray, kadibna waxay ka shaqeyn doonaan inay dib kuugu sameeyaan kaar cusub. Haddii lasoo sheego in kaarkaaga la xaday oo aad aragto in la sameeyay gelitaan aadan adiga ogolaan, qeybta taageerada GiveCard waxay kula shaqayn doontaa si aad usoo gudbiso cabasho.

Xaddidaadaha Isticmaalka lacagta

Dhammaan kaararka debit-ka, badanaa waxaa jira xaddidaad ku saabsan inta lacag ah ee aad ku bixin karto dhaqdhaqaaqiiba, maalintii, ama bishiiba. GiveCard-kaaga, xaddidaadaha waa sida soo socota:

- Ugu badnaan dhaqdhaqaaqii: $5,000
- Ugu badnaan maalintii: $5,000
- Ugu badnaan bishii: $5,000
- Xadka guud ee uu qaado kaarka: $9,999 halkii kaar

Wax Iibsashada Onlaynka ah

Markaad wax online ka iibsanayso, waxaa lagu weydiin karaa inaad geliso "Cinwaanka Biilka". Tani way ka duwan tahay "Cinwaanka Dirista". Cinwaanka Dirista waa cinwaanka aad rabto in alaabta aad onlaynka ku iibsatay la geeyo. Cinwaanka Biilka waa cinwaanka uu kaarkaaga ku diiwaangashan yahay.

Markaad isticmaalayso GiveCard-kaaga si aad wax onlyn ugu iibsato, waa inaad gelisaa cinwaanka biilka ee soo socda - ha gelin cinwaanka gurigaaga ama cinwaanka dirista maadaama kaarku uusan shaqeyn doonin:

AidKit

2000 S. Colorado Blvd.

DHISMAHA 1 - 2000 - #177

Denver, CO 80222

Khilaafaadka iyo Racfaannada

Ujeeddo

Ujeeddada siyaasaddan waa in la bixiyo hannaan cad, cadaalad ah, oo la heli karo oo lagu xalliyo khilaafaadka iyo rafcaannada ka dhasha go'aamada lagu gaaro inta lagu jiro Barnaamijka Tijaabada.

Baaxadda

Siyaasaddan waxay khuseysaa dhammaan xarumaha, wakiillada xarumaha, iyo shaqaalaha ka qayb qaadanaya Barnaamijka Tijaabada Best Starts Child Care ee Mushaar Kordhinta Daryeelka Carruurta.

Mabaadi'da Guud

1. Cadaalad: Dhammaan khilaafaadka iyo rafcaannada waxaa loola dhaqmi doonaa si dhexdhexaad ah oo ixtiraam leh.
2. Daahfurnaan: Dhammaan go'aamada la xiriira khilaafaadka iyo rafcaannada waa la diiwaangelin doonaa, sababaha go'aannadana si cad ayaa loogu sheegi doonaa dhammaan dhinacyada ay khusayso.
3. Waqtiyeyn: Dhammaan khilaafaadka iyo rafcaannada waxaa la xallin doonaa muddo macquul ah gudaheed

Sababaha Racfaanka

Ka qaybgalayaashu waxay racfaan gudbin karaan haddii ay aaminsan yihiin:

- In si khalad ah loogu go'aamiyay inay u qalmin Barnaamijka Tijaabada.
- In codsigooda ama diiwaangelintooda si khalad ah loga shaqeeyay.
- In si aan caddaalad ahayn looga saaray Barnaamijka Tijaabada sabab la xiriirta khaladaad maamul ama fasiraad khaldan oo siyaasadaha Barnaamijka Tijaabada ah

Habka Gudbinta Cabashada ama Racfaanka

1. Xallinta Hore: Ka-qaybgalayaasha waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay la xiriiraan La-hawlgalayaasha Barnaamijka ee The Imagine Institute lambarkan 206-492-5249 si ay u isku dayaan xallin aan rasmi ahayn oo dhibaatadooda ah.
2. Gudbinta Rafcaan Rasmi ah: Haddii arrinta aan si aan rasmi ahayn loo xallin karin, ka-qaybgaluhu wuxuu gudbin karaa rafcaan qoraal ah. Rafcaanka waa inuu ka koobnaadaa:
    a. Magaca kaqeybgalaha, magaca xarunta (haddii ay jirto), iyo macluumaadka xiriirka.
    b. Sharaxaad faahfaahsan oo ku saabsan arrinta iyo sababta ka qaybgaluhu u aaminsan yahay in go'aan khaldan yahay.
    c. Dukumeentiyo kasta oo taageeraya (tusaale, waraaqo, warqadaha mushaharka, ama caddeymo kale oo khuseeya). Racfaannada waa in la gudbiyaa 30 maalmood gudahood laga bilaabo go'aanka muranka leh ama dhacdada.
3. Dib-u-eegis iyo baaritaan:
    a. Dan-wadaagaha Barnaamijka Tijaabada waxay xaqiijin doonaan helitaanka racfaanka 10 maalmood gudahood.
    b. Dib-u-eegis iyo baaritaan ayaa la sameyn doonaa, oo ay ku jiraan la-tashi lala yeesho dhinacyada ku habboon iyo baaritaanka dukumeentiyada taageera.
4. Go'aan:
    a. Go'aan qoraal ah ayaa la siin doonaa 30 maalmood gudahood kadib markii racfaan la gudbiyay, kaasoo faahfaahinaya natiijooyinka iyo sababaha go'aanka.
    b. Haddii waqti dheeraad ah loo baahdo sababo la xiriira adkaanta kiiska, dacwad-oogaha si qoraal ah ayaa loo ogeysiin doonaa.
5. Kordhinta: Haddii ka-qaybgaluhu uusan ku qanacsanayn go’aanka, wuxuu rafcaanka u gudbin karaa heerka County-ga. Habka kordhinta iyo macluumaadka xiriirka waxaa lagu bixin doonaa go’aanka qoraalka ah ee ka imanaya Dan-wadaagayaasha Barnaamijka Tijaabada.

Xallinta

Natiijada rafcaanka waa kama dambeys haddii aan la sii gudbin. Ka-qaybgalayaasha waxaa lagu wargelin doonaa tallaabo kasta oo sixitaan ah ama wax ka beddel ah oo ka dhasha rafcaanka, haddii ay khuseyso.

Diiwaan-hayn

Dhammaan khilaafaadka iyo rafcaannada waa la diiwaangelin doonaa, oo ay ku jiraan taariikhda gudbinta, nooca arrinta, tallaabooyinka la qaaday, iyo xalka ugu dambeeya. Diiwaannadan waxaa loo hayn doonaa ujeeddooyinka kormeerka iyo dib-u-eegista.

Qiimeynta iyo Waxyaabaha Laga Bartay Barnaamijka Tijaabada

Waxaan bogaadineynaa ka-qaybgalkaaga iyo jawaab-celintaada ku saabsan Barnaamijka Tijaabada. Ka-qaybgalka sahannada iyo kooxaha doodda waa ikhtiyaari, wuxuuna naga caawiyaa inaan fahanno saameynta kordhinta mushaharka ee noloshaada maalinlaha ah. Sidoo kale waa meel aad kusoo bandhigi karto aragtidaada ku aadan Barnaamijka Tijaabada. Waxaan si dhab ah u qaadannaa jawaab-celintaada, waxaanan qiimeynaa waqtigaaga. Inta badan, waxaa laga yaabaa inaan siino bakhtiyaa-nasiib ama kaar hadiyad ah dadka ka qaybqaata sahannada ama kooxaha doodda.

Fikir-celinta iyo Wada-xiriirka

Ka-qaybgalayaasha Barnaamijka Tijaabada waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay ka qaybqaataan hawlaha qiimeynta si ay u bixiyaan jawaab-celin ku saabsan habraaca iyo waxa laga bartay Barnaamijka. Haddii aad qabto jawaab-celin dheeraad ah, fadlan isticmaal waddooyinkan wada-xriirka:

- Su'aalo Guud & Caawimaada Farsamada: baskwageboost@imaginewa.org
- Qiimaynta: bskwageboosteval@urban.org
- Kooxda Shaqada: Charlotte@uncommonbridges.com
- Wada-xiriirka: beststartsforkids@wearerally.com
- Maareeyaha Barnaamijka est Starts ee Kordhinta Mushaharka Daryeelka Carruurta: BSKWageBoost@kingcounty.gov

Taageero Farsamo iyo Caawimaad

Taageerada Farsamada waxaa si toos ah loogu heli karaa afafka kala ah Af-Soomaali, Af-Isbaanish, iyo Af-Ingiriis. Kooxda Taageerada Farsamada waxay sidoo kale adeegsan kartaa turjubaan telefoon oo luqado kale oo dheeri ah.

Taageerada Farsamada waxaa si toos ah looga heli karaa telefoonka inta u dhaxaysa 8:00 subaxnimo iyo 6:00 galabnimo (PT). Wixii macluumaad dheeri ah, wac 206-492-5249 ama iimayl ku dir BSKwageboost@imaginewa.org.